



Cabot's core values are:

**Partnership Inclusion Excellence**



**Cabot Primary School**

Learn together, respect each other, achieve forever


[www.cabot.bristol.sch.uk](http://www.cabot.bristol.sch.uk)

Jimce 30<sup>ka</sup> Sibtember 2022

Gacaliyayaal Waalidiin iyo Daryeelayaal, Aad ayaad ugu mahadsan tihiin shaqooyinkii adkaa aad qabateen ee ku saabsanaa sidii aad nooga caawin lahaydeen inuu dugsigu ku billowdo si wanaagsan xilligii furitaanka.

Carruurta waxay dugsiga ku yimaadaan dharka dugsiga iyagoo diyaar u ah in ay wax bartaan taasoo gacan ka geystay jawi deggen oo lala qabsan karo.

Carruurta Fasallada 5/6 ayaa durbaba booqday Deanfield, Xarun dugsiga dibadda ka ah, si ay dugsiga ugu matalaan dabaaldegga 50 Guuradooda, dhawr maalmood oo ah WOW days si carruurta loogu xiiso geliyo waxbarashadooda iyo booqashada Roustabout Theatre Company, kuwaasoo soo bandhigay sheekada Dinosaurs iyo wayaabaha la xiriira.



Sida aad ogtihiin, waqtigii Sammarka, dugsiga Cabot wuxuu ka mid noqday Excalibur Academies Trust. Tan macnaheedu waa in laga yaabo inaad aragto calaamaddooda oo waraaqaheenna ku daabacan. Mrs Edmondson, oo ah Madaxa Fulinta, qaabilsanna caawinta dugsiyadaas oo dhan, ayaa na soo booqatay waxayna u imaan doontaa mar kale in ay abuurto geed dhawaan si ay u muujiso sida ay nooga go'an tahay wadashaqeyn wadajireed.



Mahadcelinta ugu dambeysa ayaan dhammaantiin idiin leeyahay sida aad uga soo qeyb gasheen kulannada waalidiinta ee fasal walba. Waxaan rajeynayaa in kuwaas ay ahayeen kuwo aan rasmi ahayn oo ku siinaayey fursad aad ku aragto fasalka canuggaada. Fadlan kaalay lana hadal macallimiinta haddii aad qabto wax walaac ah.

Ku raaxeyso dabayaaqada usbuuca waxaanna dhawreynaa inaan idiin aragno kulligiin maalinta isniinta, idinkoo u diyaar ah usbuuc kale oo wanaagsan.

Mahadsanidiin,

Mrs L-H

### Taariikhaha Xusuus-Qorka

Oktoobar – Bisha Taariikhda Dadka Madoow

6<sup>da</sup> Oktoobar Maalinta gabayada

6<sup>da</sup> Oktoobar Fasallada 3, 4, 5 iyo 6 waxay lahaan doonaan bandhigga Tiyaatarka Hawada Nadiifka ah.



### Fadlan ku qor magaca carruurta funaannadahooda

Fadlan hubi in dharka carruurta magac lagu qoray. Waxaa jira funaanado cusub oo yaal qeybta hantida dhuntay! Haddii canuggaada ay funaanad ka dhuntay, fadlan ka fiiri biraha ama kuraasta dhaadheer ee bannaanka dhammaadka maalinta maadaama aan funaanadaha meeshaas aan dhigno kuwaasoo aan awoodi weynay inaan carruurtii lahayd aan siinno..

### Imaanshaha



Ka dib kala go'ii waxbarashada Covi-ka dartiis, aad ayey muhiim u tahay inaan wada-shaqeyno si aan ardaydeenna oo dhan aan u siinno fursadda ugu wanaagsan ee aan awoodno. Waxaa jira caawinaad loo meel dayey si ay wax uga tarto daboolidda waxbarashadii la seegay. marka, fadlan xaqiiji in canuggaada uu dugsiga yimaado sida ugu badan ee macquulka ah. Haddii canuggaada uu aad u xanuunsan yahay, fadlan soo wac xafiiska dugsiga inta uu dugsigu billaabanin una sheeg.

Laga billaabo usbuuca dambe, waxaan beddeli doonnaa sida aan dugsiga u imaadno – Albaabka cagaaran waxaa la furi doonaa 8:35am sidii caadada ahayd laakiin albaabka buluugga ah waxaa la furi doonaa 8:40am (5 daqiiqo ka hor). Tan waxaa loo yeelay in la helo waqti lagu gaaro fasallada si fasallada albaabadooda u furmaan 8:45am. Carruurta si toos ah ayey u geli karaan waxayna u xasili karaan waxbarashada. Aad ayaan kaaga mahadcelineynaa caawinaaddaada ku aaddan arrintaan, waxaanna ku weydiisaneynaa in crruurtaada aad la joogto inta albaabada fasallada furmaayaan; si loo hubiyo in carruurta ay si xasillan oo nabdoon ku joogaan. Rajiistarrada waxaa la yeerin doonaa ugu dambeyn 8:55am albaabadana waqtigaas ayey xermaayaan (Waqtigaas ka dib, waa ay baxaayaan!). Haddii aad timaadid waqtigaas ka dib, fadlan canuggaada geey xafiiska si uu isu xadirriyo. Tana waxay naga caawineysaa in canug walba aan xaadirinno uuna bad qabo.

Waad ku mahadsan tihiin caawinaaddiina arrintaan ku saabsan.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Pring ama Marwa Thomas ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630